



KU: CIDDII DANAYNAYSA

UJEEDDO: **ISKAASHATADA LAYDHTIRIIGGA BUHODLE**

Bismillaahi;

Waxaa lala socodsiiyay ganacsatada iyo dhammaan ciddii xiisaynaysa in la qaban qaabinayo in Buhodle laga abuurto ama laga hirgeliyo shirkad koronto oo iskeed u taagan taasoo awood u leh

- 1- Inay bixiso awood koronto oo kufilan isla markaana dhiirri-gelin karta maalgashi mashaariiceed hor leh, xaddaarad iyo horumar.
- 2- Inay ka qayb-qaadato bilicda magaalada.

Waxay xaashidani qiimeweyn oo gaara siinaysaa shirkadaha isgaarsiinta ee hadda bixiya laydhtiriigga waxaana u rajeynayaa inay hormuud ka noqondoonaan mashruucan oo dhammaanteen inoo leh muhimmad gaar ah.

Sidaa awgeed ciddii danaynaysa gudo iyo dibedba waxaan ogaysiinaynaa inay lasoo xidhiidhaan duqa qaban-qaabada si loosiiyo macluumaad loona diwaan geliyo. Iyadoo immika lagu jiro wejigii qaban qaabada.

Waxaan sidoo kale kusoo dhoweynayaa cidkasta oo qayb ka qaadan karta hirgelinta mashruucan talo bixin, wax qabad iyo dhammaan wixii dhiirri-gelinkara.

Allaa mahad leh  
wbt

Madaxa qaban-qaabada

Mds: ***Cabdiraxman A. Kaboshaagle***

.....

Nagala soo Xidhiidh

Mobile telefon: +252 90224580      +252 2449 8484      +252 660 10012

Email: [kaboshaagle@yahoo.com](mailto:kaboshaagle@yahoo.com)